

War-murtiyeed

Isbeddelka Cimilada iyo Xasaradaha Geeska:
Caqabadaha, Falcelimaha iyo Qorshayaasha lagu maarayn karo

Madasha Aragti-wadaagga
Sannadlaha ah
4 -6 Diseenber 2022, Jabuuti

Madasha Aragti-wadaagga Sannadlaha ah ee Machadka Daraasaadka Siyaasaadda ee Heritage, oo markii lixaad lagu qabtay magaalada Jabuuti 4-6 bishii Diisenber 2022; ayaa guul ku soo dhammaatay. Waxa kulanka ka soo qayb galey in ka badan 500 oo qof, kuwaas oo isugu jira jaangooyeyaal-siyaasadeed, aqoonyahanno, hoggaamiyeyaal ganacsi iyo bulshada rayidka a. 350 ka mid ah ka soo qaybagalayaasha ayaa ka kala yimid dalalka Geeska Afrika iyo dacallada dunida. Ka soo qaybgalayaasha shirka ayaa muddadaas saddex maalmood ah ku hawllanaa soojeedimo daraasadeed, aragti-wadaag iyo doodo siyaasadeed.

Jamhuuriyadda Jabuuti oo uu horsed ka yahay Madaxweynaha Jabuuti mudane Ismaaciil Cumar Geele ayaa martigelisay madasha sannad laha ah.

Maalintii ugu dambaysay waxa shirka si wadajir ah uga soo qaybgalay Madaxweynaha Soomaaliya mudane Xasan Shiikh Maxamuud iyo Madaxweynaha Jabuuti mudane Ismaaciil Cumar Geelle, oo madasha ka jeediyay hadalkii soo xidhitaanka. Dhanka kale, waxa shirkan oo sannadkan mawduucisu ahaa **Isbeddelka Cimilada iyo Xasaradaha Geeska** ka soo qaybgalay wafti heer-sare ah oo ka kala socday dalalka Soomaaliya, Itoobiya, Kenya iyo Jabuuti. Waxa waftida ka mid ahaa raysalwasaare-ku-xigeenka Soomaaliya mudane Saalax Jaamac iyo wasiirro ruugcaaddaa ah oo ka kala socda dalalka Itoobiya, Jabuuti, Kenya iyo Soomaaliya.

Madasha Aragti-wadaagga sanadlaha ahi waxa ay doorkan ku soo beegantay sannad guurada 10-aad ee ka soo wareegtey kolkii Machadka Heritage la aasaasay. Tan iyo markii la aasaasay, waxa uu Machadku abuuray jawi dhiirrigalinaya wadaxaajoodka, waxaanu kaalin laxaad leh ka qaatay tilmaan-bixinta geeddi socodka siyaasadda Soomaaliya. Maadaama uu machadku foolaad u yahay xarumaha daraasaadka Soomaaliya, waxa uu kor u qaaday dhaqanka dajinta siyaasado xaqiiqooyin ku dhisan, kuwaas oo dal iyo dabadba hadda laga tixgaliyo, noqdayna wax la isla fahmayo.

Sida ku cad yoolalka barnaamijka; Madasha Aragti-wadaagga Sannad laha ah ee Heritage; waxa looga golleeyahay in la abuurto madal kulmisa afkaaraha siyaasad-dajiyeyaasha Soomaaliya, hoggaamiyeyaasha Geeska, hormuudka ganacsiga, bulshada rayidka ah, aqoonyanka iyo dadka u dhaqdhaqaaqa arrimaha bulshada.



Madasha Aragti-wadaagga Sannadlaha ah (AFI2022) oo sannadkan mawduuceedu ahaa **Isbeddelka Cimilada iyo Xasaradaha Geeska: caqabadaha, falcelimaha iyo qorshayaasha lagu maareyn karo**, ayay Saddexdii maalmood ee shirku socday, ka soo qaybgalayaashu ku lafagureen xidhiidhka ka dhexeeya isbeddelka cimilada, xasaradaha iyo kaalinta dowladaha Geeska Afrika.

Saddexdan maalmood waxa socday wada-hadallo siyaasadeed oo baaxad leh iyo aragti-wadaag dhex martay in ka badan 500 oo ka soo qaybgale, kuwaas oo ka kala yimid Geeska Afrika iyo dunida dacalladeeda;

Falanqayn dheer ka dib, ka soo qaybgalayaasha shirku waxa ay ogaadeen:

- Natijoooyinka 43 daraasad-cilmiyeed oo ay madasha ka soo jeediyeen haldoorka aqoonyahanka iyo xeeldheerayaasha ka faallooda xidhiidhka ka dhexeeya isbeddelka cimilada iyo colaadaha Geeska.
- Saamaynta baaxadda leh ee uu isbeddelka cimiladu ku leeyahay nolosha iyo hab-nololeedka muwaadiniinta Geeska Afrika;
- Istaraatiijiyadda uu urur goboleedka IGAD ka leeyahay Isbeddelka Cimilada sannadaha 2022-2030 iyo Qorshe-hawleedka Midowga Afrika ka leeyahay Isbeddelka Cimilada iyo Istaraatiijiyadda Kor u qaadista U-adkaysiga Cimilada sannadaha (2022-2032), kuwaas oo si ballaadhan u tilmaamaya iswaafajinta iyo isku-dubaridka qorsheyaasha gobolku kaga falcelinayo isbeddelka cimilada;
- In Jamhuuriyadda Jabuuti dhowaan aasaastay Xarun-Goboleedda Kormeerka Daraasaadka Deegaanka iyo Cimilada (RROEC), oo wax weyn ka tari doonta awoodda ay dalalka Geeska Afrika u yeelanayaan la qaybsiga iyo yaraynta saamaynta isbeddelka cimilada. Waxa kale, oo ay ka soo qaybgalayaashu xuseen Shirwaynaha Isbeddelka Cimilada oo la qabtay bishii Oktoobar sannadkan 2022; kaas oo dhiirrigaliyay mawduuca Madasha Aragti-wadaagga Sannadlaha ah ee 2022;
- In isbeddelka cimiladu yahay dhibta ugu weyn ee soo foodsaartay siyaasadda Geeska Afrika iyo guud ahaan dunida maanta;
- Baahida degdega ah ee loo qabo falcelin gobolku ka midaysan yahay iyo isku dubbaridka hababka lagu yaraynayo saamaynta xun ee uu isbeddelka cimiladu ku yeeshay Geeska;



- Dalalka xubnaha ka ah urur goboleedka IGAD waxa haysta caqabado awoodeed oo baaaxad leh, marka loo eego xogaha sayniska, agabyada falcelinta iyo aqoonta ka gaashaamashada, waxaanay ku dadaalayaan in ay hirgaliyaan qorshayaashooda la qabsiga iyo yaraynta saamaynta isbeddelka cimilada.
- Beesha caalamka oo ay ugu horreeyaan dalalka dunida wasakheeyay ayaan falcelin ku filan ka gaysannin caawimada dalalka dunida ugu nugul oo ku yaalla Geeska Afrika.
- Dalal badan oo xubno ka ah IGAD ayaan hirgallinnin Qorshayaasha Laqabsiga Qaranka (National Adaptation Plans) oo lafdhabar u ah hab-dhaqanka siyaasadaha ku habboon cimilada.

AASAASKA HAWLWADEENNO HEER GOBOL AH

Ka soo qaybgalayaasha Madasha Aragti-wadaagga oo tixgalinaya qodobbada kor ku xusan:

Ayaa soo jeediyay in Geeska Afrika loo sameeyo Hawlwadeenno Heer Gobol ah; oo ka shaqeeya arrimaha isbeddelka cimilada, oo ujeeddadoodu tahay:

- **Dardargalinta** isku xidhka hawlaha dalalka xubnaha ka ah IGAD; kuwaas oo ku wajahan dhaqangalinta qorshayaasha deegaanka iyo isbeddelka cimilada sannadaha 2030 iyo 2063- iyo waliba heshiisyada kale ee la xidhiidha wajiyo badanta arrimaha deegaanka.
- **Qeexitaanka iyo ka talobixinta** halbeegyada loo dajiyay siyaasadaha lagu xoojinayo maaraynta deegaanka iyo isbeddelka cimilada, maamulka kor u qaadista waaritaanka khayraadka deegaanka iyo laqabsiga iyo yaraynta saamaynta isbeddelka cimilada.
- **Qiimaynta** awoodaha dowladda iyo hay'adaha jira iyo aqoonsiga caqabadaha ugu waa weyn ee deegaanka iyo isbeddelka cimilada ka dhashay ee haysta dalalka Geeska, sida; iskaashiga ka dhexeeya hay'adaha, kobcinta qaab-dhismeedka sharciga iyo kaladanbaynta, isdhaafsiga aqoonta iyo hab-dhaqanka maaraynta togan.
- **Baadhidda** khataraha deegaanka iyo cimilada iyo waliba hagidda siyaasadda-waafaqsan u diyaargarowga, ka hortagga, iyo halbeegyada yaraynta khataraha ka jira dalalka Geeska iyo wargalinta hay'adaha kale ee arrintani qusayso.



XOGHAYNTA HAWLWADEENNADA HEER GOBOL

Ka soo qaybgalayaashu waxa ay Machadka Heritage u wakiisheen in uu noqdo xoghaynta guddida Hawlwadeenna Heer Gobol, oo Geeska Afrika u qaabbilaysa isbeddelka cimilada, isaga oo shaqadaas si dhow ugala shaqayn doona urur goboleedka IGAD iyo dowladihiisa xubnaha ka ah ururka iyo waliba ururrada bulshada rayidka ah ee ay shaqadani qusayso; iyada oo aragti ahaan loo marayo aqoonsiga iyo kulminta xeeldheerayaal loo dhan yahay iyo saraakiisha dowladaha oo ah kuwa fududayn kara in lagu tallaabsado waxqabad loo dhan yahay oo heer gobol ah.

Guddida hawlwadeennadu waa in ay bisha Jannaayo 2023 magacaabaan Isuduwe-guud oo aqoon sare u leh arrimaha isbeddelka cimilada, kaas oo masuul ka noqonaya in sida ugu dhaqsaha badan loo hawlgeliyo Hawlwadeennada Heer Gobol.

Si taas loo gaaro, waxa ay dowladaha Jabuuti, Soomaaliya iyo Itoobiya (oo loo marayo Dowlad Deegaanka Soomaalidu) ballan-qaadeen in ay bixinayaan waxyaabaha lagama maarmaanka u ah geeddi-socodka shaqada howlwadeennada gobolka oo ay dowladaha wakiil uga yihiin Wasaaradahooda deegaanku. Sida oo kale, Madashu waxa ay ka urur goboleed ahaan ku boorrisay ururka IGAD, in uu taageero hagar la'aan ah u fidiyo shaqada Hawlwadeennada Heer Gobol.

Hawlwadeennadan waxa laga rabaa in ay afar-bilood gudahood ku sameeyaan, kuna soo bandhigaan qorshahooda shaqo oo dhamaystiran. Intaa waxaa dheer, shaqada Guddi-hawleedka waxa sannadkasta lagu soo bandhigi doonaa Madasha Aragti-wadaagga Sannadlaha; iyada oo la tixgelinayo muhiimadda ay leedahay arrintani.



MAHADNAQ

Ka soo qaybgalayaashu waxa ay mahadnaq ballaadhan u soo jeediyeen Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle, oo shan sano si hagar la'aan ah u martigelinayay Madasha Aragti-wadaagga Sannadlaha ah iyo taageerada uu la garabtaagan yahay shaqada muhiimka ah ee uu Machadka Heritage u tafoxaytay.

Ka soo qaybgalayaasha ayaa sida oo kale u mahadnaqay Madaxweynaha Soomaaliya mudane Xasan Shiikh Maxamuud oo khudbad dhinacyo badan taabanaysa ka jeediyay Madasha Aragti-wadaagga Sannadlaha ah ee 2022; inkasta oo uu si weyn ugu mashquulsanaa la dagaallanka argagixisada al-Shabaab haddana wakhtiga uu madasha u soo huray muhiimad gaar ah lahaa. Ka soo qaybgalayaasha ayaa muujiyay sida ay shacabka iyo dowladda Soomaaliya ugu garabtaagan yihiin dagaalka xaq ah ee ay Soomaaliya kula jirto argagixisada al-Shabaab.

Ka soo qaybgalayaashu waxa ay sida oo kale u mahadceliyeen qabanqaabiyeyaasha Madasha Aragti-wadaagga Sannadlaha ah ee 2022; waxaanay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage iyo Jaamacadda Jabuuti ku bogaadiyeen sida ay isugu habboon yihiin xilliga iyo mawduucu, abaabulka quruxda badan iyo soo dhoweynta aan la qiyaasi karin. Ka soo qaybgalayaasha oo mahadcelintooda sii wata ayaa mar kale Machadka Heritage ku hambalyeeyay sanad-guuradiisa tobnaad iyo guulaha u soo hoyday, waxaanay u rajeeyeen sannado kale oo ku dayasho iyo horumar dhanka cilmibaarista iyo wadatashiga ku salaysan in uu ku sii tallaabsado.

